



**UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"**

Maanta oo ay taariikhdu tahay 23/01/2025, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

<b>WAKAALAD BIXIYE:-</b> CABDI CAWAD IBRAAHIN Hooyo: Caasho Sheekh Saciid, Somali ah, Ku Dhashay: Laascaanood, Sanadkii: 1948, Sita: Somali Passport, Lr. P01570947.	<b>LA WAKIISHE:-</b> CARAFAAD CABDI CAWAD, Somali ah, Hooyo: Fowsiyo Maxamed Ismaaciil, Ku Dhashay: Kenya, Sanadkii: 1993, Degan Usa Hadana Ku Sugan Muqdisho, Sita: USA Passport, Lr. 665506457																																								
<b>TILMAAMAHA GURIGA</b> Guri Dhisan oo Ku yaal: <b>Muqdisho</b> , Degmada: ( <b>Hodan</b> ), Cabirka: ( <b>13,50X13,50</b> )-M, W.M.L: ( <b>347/81</b> ), Tr. 07/03/1981, Kana Soo Baxday Maxkamada Degmada Xamar, ayna Saxiixayn Garsoore: <b>Dr. Maxamed Xaaji Saciid</b> , Kaaliye: <b>C/qaadir Sh.Xasan-Cadde</b>	<b>SOOHDINTA DHULKA</b> Bari: <b>Jid</b> , Koonfur: <b>Dhul dad Galbeed: Dhul dad</b> , Waqooyi: <b>Jid</b> <table border="1"><tr><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td></tr><tr><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td></tr><tr><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td></tr><tr><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td></tr><tr><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td></tr></table>																																								

**B-** Aniga oo ah **CABDI CAWAD IBRAAHIN**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskax ahaan iyo Jir ahaanba ka Fayow Cid I Khasbaysana Aysan jirin in aan Wakiishay Wiilkeyga **CARAFAAD CABDI CAWAD** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Guriga Tilmaamihisu Sare Ku Xusan yahay, Uuna ka geeriyooday **Aabahay Marxuum Cawad Ibraahin Caraale**, in Qayb Dhaxaleedka aan Ku Lee yahay Gurigaas in uu gadi karo, Wareejin karo, Hibeyn karo, Dhaxalkoob u Sameyn karo, dhisi karo, ijaari karo, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, uguna doodi karo Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **CARAFAAD CABDI CAWAD** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Hantidaas aan soo sheegay ka macaamilideeda wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

**T-** Aniga oo ah **CARAFAAD CABDI CAWAD**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey Aabahey Cabdi Cawad Ibraahin, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

**J-** Anaga oo Kala ah **Bashiir Maxamuud Saalax & Ismaaciil C/xakiin Saciid** Waxaan Cadaynaynaa in aan Markhaatiyaal iyo Goob Joogba Ka nahay Wakaalada Sare Ku Xusan.

**SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA**

CABDI CAWAD IBRAAHIN

**SAXIIXA LA WAKIISHAHA**

CARAFAAD CABDI CAWAD

**SAXIIXA MARKHAATIYAASHA**

1- BASHIIR MAXAMUUD SAALAX

2- ISMAACIIL C/XAKIIN SACIID

**(XAFIISKA NOOTAAYAHA)**

REP. 1360/T.P.N/25, Tr. 23/01/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **Cabdi Cawad Ibraahin** Ahna (Wakaalad Bixiye), 2- **Carafaad Cabdi Cawad** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"



**MASAWIRKA WAKAALAD BIXIYAHA**

**CABDI CAWAD IBRAAHIN**



**MASAWIRKA LA WAKIISHAHA**

**CARAFaad CABDI CAWAD**



**MASAWIRADDA MARKHAATIYAASHA**

**1-BASHIIR MAXAMUUD SAALAX**



**2-ISMAACIIL C/XAKIIN SACIID**









-JAMHURIYADDA DIMOQRAADIGA SOMALIYA-

LAM. 347/81.

MAXKAMADDA DEGMAADDA XAMAR-

Tr. 7/3/81.

Ujeedo: beec guri.

Xuseen Maxamed Diirshe, ee soomaali ah jira 31 Sano, degen H.Wadaag, W.A.L. 61856/ Kamar. Wuxuu iska gaday gurigiisa ku yaal Xamar Deg. Hodon, kana kooban 2 Qol ee Bulukeeti ah, W.DH. 13, 50 X 13, 50. mitir. W.M.L. 30/78. TR. 31/1/78. ee ka soo baxday, Maxkamadda Deg. Xamar. Soohdintiisa Bari: jid, gal-beed: jid; waqooyi: guri dad, koofur: guri dad,

Waxaa ka iibsaday gurigsas, Cawad Ibraahim Carraale, ee Soomaali ah jira 74 Sano, degen Hodon, W. N. L. 41277/ Kamar. Wuxuu kaga iibsaday lacag dhan Sh. 50. 35.000/= (Soddonshankun). Lana siiyey lacagtaas

iska gadaha sida uu ka qirtay Maxkamadda horteeda; Saas-darteed, Milkigii gurigaasu wuxuu u soo wa-

reegey, Cawad Ibraahim Carraale. beec ansax ah waafaqsana Sharciga. Waxaana ka marag ahaa:- I)- Mire Colaad

Cawaale; (2)- Maxamed Wrsame. =====

KAALIYAHA MAXKAMADDA/

GARSORAHA MAXKAMADDA/

(Cabdulqadir Sh.Xasan)

(Dr. Maxamed Xaaji Siciid);





## FOOMKA BIXIN DUKOMINTI ORIGINAL

REF1360/W.P.N/22

Tr:04/09/2022

Magaca Milkilaha

Dahabo Cismaan Axmed Cali

Magaca qaadaha: →

Cumar Muxyadeni Cali

Meeshuu deganyahay →

Garas badley

Telfoonkiisa: →

~~0615~~ 0618868493

SAXIIXA BIXIYAHA:



SAXIIXA QAADAHA:

